# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## Wasaaradda Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska

## SIYAASADDA JOOJINTA GUDNIINKA HABLAHA

2024

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**
WASAARADDA SHAQO-GELINTA, ARRIMAHA
BULSHADA & QOYSKA

**جمهورية صوماليلاند**
**وزارة العمل الشؤون الأجتماعية والأسرة**

**MINISTRY OF EMPLOYMENT, SOCIAL AFFAIRS & FAMILY**

**XAFIISKA WASIIRKA**

**WSHAB&Q/01/ 237 /2024** — **18th September, 2024**

## WAREEGTO WASIIR

## DHAQANGALKA SIYAASADDA QARAN EE JOOJINTA GUDNIINKA HABLAHA

**Markaan arkay:** Qodobka 36aad [2] ee Dastuurka JSL oo si cad u tilmaamaysa in ay dawladu dhiirigeliso, isla markaana xeerar ka soo saarto xaqiijinta xuquuqda ay haweenku u leeyihiin in ay xor ka noqdaan caadooyinka & dhaqamadda ka soo horjeeda shareecadda, waxna u dhimaya jiritaanka & karaamadooda qofeed.

**Markaan arkay:** qodobka 24aad [2] ee Dastuurka JSL, kaas oo tilmaamay in muwaadin kasta xaq u leeyahay in uu helo xuquuqda nebad-gelyadda jidheed ee aasaasiga ah & in ay mamnuuc tahay waxyeelo kasta oo jidheed oo la gaadhsiiyo muwaadiniinta.

**Markaan tixgeliyay:** Qodobka 24aad [3] ee Dastuurka JSL, oo qeexaya in qof kasta oo muwaadin ahi uu helo xuquuqda in loo dhawro karaamadiisa, sharaftiisa & noloshiisa gaar ahaaneed.

**Markaan arkay:** deraasaddaha lagu sameeyay dhibaatooyinka uu haweenka u leeyahay gudniinku, lana xaqiijiyay in uu wax u dhimayo, xad-gudubnka ku yahay caafimaadka jidheed, maskaxeed & karaamadda qofeedba.

**Markaan la tashadday:** culimadda, dhakhaatiirta, aqoonyahanka, ururadda bulshadda & guud ahaan qaybaha kala duwan ee bulshadda, kuwaas oo isku-raacay dhibaatadda & saamaynta tabban ee uu gudniinku ku leeyahay haweenkeena & in uu yahay dhaqan waxyeello leh oo lala qabatimay, islamarkaana aan sal ku lahayn maqaasida shareecadeena suuban ee islaamka.

**Markaan tixgeliyay:** baaqyadda kala-duwan ee ka imanaya qaybaha bulshadda, lana xidhiidha sidii wax looga qaban lahaa gudniinka hablaha oo waxyeelo & xad-gudub ku ah caafimaadka, sharafta & karaamadoodda.

**Asbaabtaas sare dartood, waxa aan soo saaray:**

Wareegtadan oo lagu dhaqan-gelinayo Siyaasadda Heer Qarran ee Joojinta Gudniinka Hablaha.

**Mudane, Cali Cumar Maxamed [Xoor-xoor]**
Wasiirka Wasaarada Shaqo-gellinta, Arrimaha Bulshadda & Qoyska JSL

## Tusmada Siyaasadda


CUTUBKA 1AAD ..... 4

HORDHAC ..... **Error! Bookmark not defined.**

1.1. BAAHIQABKA SIYAASADDA ..... 4

1.2. QEEXID IYO TAARIIKH KOOBAN ..... 4

1.3. Xaaladda Guud ..... 4

1.4. Lafo-gurka Xaaladda ..... **Error! Bookmark not defined.**

1.5. Aragtida Qaranka Jumhuuriyadda Somaliland ee Gudniinka Hablaha ..... 9

CUTUBKA 2AAD ..... **Error! Bookmark not defined.**

DASTUURKA IYO XEERARKA LA XIDHIIDHA GUDNIINKA HABLAHA **Error! Bookmark not defined.**

2.1 Dastuurka Somaliland ..... 6

2.2 Xeerarka Caalamiga ah ..... 7

CUTUBKA 3AAD ..... 10

YOOLKA, UJEEDDOOYINKA IYO DANTA LAGA LEEYAHAY SIYAASADDA ..... 10

3.1 Ujeeddooyinka Siyaasadda Joojinta Gudniinka Hablaha ..... 10

3.2. Danta Laga Leeyahay Siyaasadda ..... 11

3.3.1 Higsi ..... 11

3.4 Natiijada Laga Filanayo ..... 11

3.5 Mudnaan-Siinta Siyaasadda ..... 12

CUTUBKA 4AAD ..... 14

Tirarka Fulinta Siyaasadda ..... 14

5.1 Mabda'a 1aad ..... 14

5.1.1 Tiirka 1aad: Wacyigelinta Bulshada ..... 15

5.1.2 Mabda'a 2aad: Cilmi-baadhis ..... 15

5.1.4 Mabda'a 3aad: Waxbarashada iyo Gudniinka Hablaha ..... 15

5.1.5 Mabda'a 5aad: Awoodsiinta Dumarka ..... 16

5.1.6 Tiirka 6aad: Xidhiidhka Wada-shaqayneed iyo is-kaashiga caalamiga ah ..... 17

CUTUBKA 5AAD ..... 17

DOORARKA WADAAGAYAASHA SHAQADA ..... 17

7.1 Wasaaraadda Shaqo-Galinta, Arrimaha Bulshada Iyo Qoyska (WSH,AB&Q ..... 17

7.2 Wasaaradda Arrimaha Gudaha ..... 18

7.3 Wasaaradda Caddaaladda ..... 18

7.4 Wasaaradda Waxbarashada iyo Sayniska ........ 18
7.5 Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka ........ 19
7.6 Wasaaradccda Warfaafinta Dhaqanka iyo Wacyi-galinta ........ 19
7.7 Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta ........ 20
7.8 Wasaaradda Dhallinyarada iyo Ciyaaraha ........ 20
7.9 Ururrada Bulshada ........ 21
6.9.1 Daladaha Ururrada Maxalliga Ah ........ 21
6.10 Hay'adaha Caalamiga ah iyo Kuwa Qaramada Midoobay ........ 21
CUTUBKA 7AAD ........ 22
DABAGALKA IYO QIIMAYNTA HIRGALINTA SIYAASADDA ........ 22
8.1 Dib-u-eegista Dhaqan-galka Siyaasadda ........ 22

# CUTUBKA 1AAD

## 1. HORDHAC

### 1.1. Baahiqabka Siyaasadda Gudniinka Hablaha, ee Somaliland

Hablaha/dumarka Somaliland ee ku dhaqan dalka gudihiisa, in ka badan boqolkiiba 98% ayaa la gudaa, siyaabo kala duwan ayaa loogu sameeyaa Gudniinka, siday sheegtay haayadda UNICEF, sannadda 2020ka. Waxaa la qiyaasayaa in boqolkiiba 99% dumarka 40 jirka ka weyni ay la nool yihiin xaaladdan keenta dhibaato caafimaad, mushkilad nafsi ah, mid qoys iyo tu dhaqaale oo saamayn xun ku yeelata qofka (ruuxa la guday) iyo koboca dhaqaale ee qaranka, siday xaqiijisay, Haayadda Caafimaadka Adduunka ee WHO, sannadkii 2011ka.

Gudniinku waxa uu kordhiyay, isla markaana kor u qaaday culayska dhaqaale iyo ka waxbarasho ee bulshada reer Somaliland, gaar ahaan midka qoyska nugul, nafsi ahaan, bulsho iyo dhaqaale ahaan.Waxyeellada Gudniinka gabdhuhu waxay saamayn toos ah ku leeday koritaanka maskaxda iyo geeddisocodka horumarka shakhsiga xaaladdan soo maray, kujira ama halista u ah ee welwelka badani ka haysto ka hor intaan la gudin.

Siday tibaaxeen cilmibaadhisyo badan, oo ku aaddan gudniinka, inta badan dadka xaaladdan mara waxaa hoos u dhacda kalsoonida ay ku qabaan dadka eheladooda ah ee ay isugu dhawyihiin dad ahaan, sidoo kale waxa gudniinku saamayn taban ku yeeshaa xidhiidhka qoyska iyo wixii la xidhiidha muxubada iyo jeceylka jinsiga ku dhisan ee qoysnimo.

Gudniinka hablahu waxa uu si toos ah uga soo horjeedaa xuquuqda aas’aasiga ah ee Aadamaha, wuxuu xushmo darro ku yahay karaamada guud ee uu huwan yahay Aadamuhu dumar iyo ragga ba. Googaynta iyo waxyeelaynta macno darrada ah ee loo gaysto xubinta taranka ee dumarku waxa ay naqdi iyo dhaliil ku tahay abuurtasan ee ILAAHAY (SWT), sidaa darteed dawladda Somaliland waxa ay u aragtay sii wadista iyo u dulqaadashada siisocodka Gudniinka Hablaha dambi-weyn oo ka dhan ah xuquuqda Aadamaha, iyo dayacaad masuuliyad qaran, intaa kaddib waxay go’aansatay Wasaaradda Shaqo-galinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoysku in la curiyo, islamarkaasna la dhaqan galiyo siyaasad cad oo ka dhan ah caadada gabowday ee Gudniinka Hablaha/dumarka ee aan diin iyo sababo caafimaadtoona ku dhisnayn.

Jamhuuriyadda Somaliland waxa ay aamminsan tahay in dhammaan nooca uu doono ha ahaadee gabadh kasta oo reer Somaliland ah iyo qofkasta (inan kasta) oo ku nool dalka Somaliland aan lagu samayn karin gudniin. Siyaasaddani waxay jidaynaysaa, isla markaasna dedejinaysaa curinta, dhammaystirka, ansixinta iyo dhaqan galinta xeer qaran oo ka dhan ah Gudniinka Hablaha, oo ka dhigi doona Gudniinka Hablaha Faldambiyeed laga galay xuquuqda Aadamaha, gaar ahaan ta dumarka iyo hablaha ee diinta Islaamku sugtay.

Mawqifkan mid la mid ah waxaa hore u qaatay, dalal badan oo ay ka mid yihiin qaar Islaam ah sida; SUDAN 22 April, 2020 meelmarisay sharci cusub oo ka dhan ah Gudniinka Hablaha, Muritaaniya (MAURITANIA, oo ku madnoocday Gudniinka sharciga summaddiisu tahay ‘{Law No. 2005–015), SENEGAL iyana ku joojisay sharciga tirsigiisu yahay (Law No. 2005-18), MASAR na waxay soo saartay iyana sharcigan (Law No. 58.2016) iyo DJABOOUTI oo iyana leh sharci sidan u dhigan oo khuseeya Gudniinka hablaha (Law No. 55. 2009)

## 1.2. Qeexid iyo Taariikh Kooban

Gudniinku waa caado guun ah oo gaamurtay. Waxaa lagu qeexaa in Gudniinka habluhu yahay caado gabawday oo badawnimo ah, isla markaasna ceeb ku ah caqliga dadka sameeya dhaqankan hadhaaga ah ee ay ka tageen ummadihii hore, ee noolaa casrujaahiligii xaddaaradda iyo horumarka Adduunku xaddidnaa. Sida taariikhdu sheegayso jiritaanka soomaalida iyo adeegsiga caadadan maaha wax la kala saari karo, oo muddo dheer ayaa jiilba jiil ka soo dhaxlaayay, siduu Dr. A. H. Taba, cilmibaadhis uu sameeyay 1980kii ku sheegay, oo ahaa sarkaal sare oo ka tirsanaa Hay'adda Caafimaadka Adduunka (WHO).

Qoraallo iyo cilmibaadhisyo badan oo la sameeyay waxay caddaynayaan in Gudniinka habluhu diin iyo cilmi midna raad ku lahayn. Dhinaca kalena uu yahay wax ku salleh xiqdi iyo faquuq jinsi oo ka dhan ah xuquuqda Aadamaha, iyo tixraaca diinta suubban ee islaamka, oo ka soo horjeedda dhibkasta oo loo gaysto caqliga, cirdiga, caafimaadka iyo jidhka qofka bani'aadanka ah. Taariikh ahaan waxa la xaqiijiyay in Gudniinka dumarku uu yahay caado bulsheed oo ku aroorta dhaqannadii faraacida, siday qirayaan cilmibaadhayaal iyo taariikhyahanno ay ka mid yihiin; HERODOTUS, noolaa qiyaas ahaan ( 484 – 425 BC) oo lagu sheego in uu yahay aabihii taariikhda, STRABO, noolaa qiyaas ahaan **(**63 BC – AD 24), oo isna loo aqoonsan yahay in uu yahay hormoodkii cilmiga joqoraafiga, iyo Carsten Niebuhr**,** noolaa **(**1733k-1815kii) oo ahaa sahamiye iyo socdaale Jarmal ah.

Raad-raacyadaa taariikheed, waxay inna tusayaan in anay jirin xaqiiqooyin rasmi ah oo sheegaya in Gudniinka iyo jar-jaridda xubnaha taranka hablahu/dumarku yahay wax ku dhisan diin iyo caqiido midna jaadkuu doonaba ha noqdee, balse yahay sida cilmibaadhisyadu muujinayaan dhaqan hadhaaya oo ku milmay qiyamka iyo rumaynta diineed ee bulshooyinka caadaystay samaynta Gudniinka hablaha/dumarka, in kastoo waddammo badan oo Afrikaan ahi ka soo saareen sharciyo ka dhan ah Gudniinka Hablaha iyo caadaysiga waxyeelloyinka daran ee loo gaysto dumarka, haddana dhibtiisu si baahsan ayay qaaradda uga jirtaa illaa hadda.
Gudniinka & jar-jaridda xubnaha taranka ee gabdhaha waxaa loo aqoonsan yahay tacaddi ka dhan ah xuquuqda aas'aasiga ah ee hablaha iyo dumarka, oo aan ku dhisnayn wax sababo caafimaad ah iyo mid diineedtoona.Gudniinku waa sinnaan la'aan xidhiidh la leh arrimaha jinsiga ee ku dhisan faquuqa iyo takoorka dumarka iyo carruurta.

## 1.3. Xaaladda Guud

Gudniinka Hablaha waxa laga isticmaalaa 28 dal oo Afrikaan ah iyo qaar ka mid ah dalal ay ku soo hayaameen sida Aasiya, Ameerika, Kanada, Yurub iyo Bariga Dhexe. Iyada oo la tixraacayo hay'adda Caafimaadka Adduunka ee (WHO 2000), HUU waxay ku qeexday Gudniinka Hablaha "Jarjaridda qayb ama dhammaan xubnaha taranka dumarka ama dhaawac kale oo loo geysto xubnaha taranka haweenka, iyada oo loo samaynayo dhaqan, diin ama sababo kale oo aan caafimaad ku salaysnayn.""Tiro lagu qiyaasay 200 milyan hablo yar yar iyo dumar isugu jira ayaa maanta la nool xaaladdaa oo la guday dunida oo dhan. Labadaa boqol (200) ee malyani waxa ay ku nool yihiin 31 waddan, siday sheegayso warbixintii u dambaysay ee Hay'adda Qaramada Midoobay ee UNICEF soo saartay (2020)

Gudniinka Habluhu waa mid si guud looga adeegsado gayiga Somaliland, iyada oo lagu sababaynaayo arrimo dhaqan, diin, iyo dhaqan-dhaqaale. Gudniinka waxa adeegsada badi bulshada ku dhaqan deegaannada Somaliland, in kasta oo hababka loo sameeyaa kala duwan yihiin miyiga iyo magaalada, habka ugu badan waa Fircooni (Nooca saddexaad III), kaas oo aad u ba'an, iyada oo dumarka xubintooda taranka la xidho.

Sida laga soo xigtay hay'adda UNICEF (survey 2020), heerka qaran ee uu marayo Gudniinka Habluhu ee dumarka da'doodu u dhaxeyso 15-49 waa 98%, kuwaas oo 77% lagu sameeyay nooca Fircooniga (Nooca Gudniinka ee III).
Nooca kale waa nooc ka dhibaato yar oo loo yaqaanno Sunnaha ama jaridda/goynta kintirka (Gudniinka noociisa – I)
Somaliland nooca Sunnaha loo yaqaannaa waa saddex nooc, kuwaas oo lagu sifeeyo Sunna I, II iyo III. Sunna I waa in la saro caarada sare ee kintirka isaga oo aan la goyn, si dhiig yar looga sii daayo. Sunna II waa in la gooyo qayb ka mid ah kintirka iyo dibnaha yaryar ee saxaaxa, iyada oo aan la xidhin xubinta taranka ee dumarka. Sunna III waa goynta qayb ka mid ah kintirka iyo xidhidda xubinta taranka ee dumarka qayb ahaan, iyada oo lagu samaynayo laba ama saddex qodob. Sunna I iyo II waxa loo sameeyaa sababo loo aanaynayo diinta Islaamka.

## 1.4. Lafo-Gurka Xaaladda iyo Milicsiga Noocyada Gudniinka Hablaha

**Nooca Gudniinka Hablaha**: hay'adda Caafimaadka Adduunka ee WHO waxa ay u kala saartaa Gudniinka dumarka caalamiyan saddex nooc oo waaweyn iyo nooc afraad oo yar. Waxana ay kala yihiin:

**Nooca I^aad^**: jaridda haragga sare, iyada oo aan la goyn qayb ahaan ama dhammaantii, kintirka,

**Nooca 2^aad^ (Sunna):** goynta kintirka iyada oo qayb ahaan ama gabi ahaanba la jarayo dibnaha yar-yar ee saxaaxa.

**Nooca 3^aad^: (Fircooni):** goynta iyo jar-jaridda qayb ahaan ama dhammaan xubinta taranka ee dibadda iyo xidhidda iyo cidhiidhi galinta daloolka saxaaxa (jar-jarid, iyo isku dhajin).

**Nooca Gudniinka ee 4^aad^:** Noocan afraad waxa uu koobsadaa inta badan hababka saddexda jaad ee kale oo dhan. Waxa la sameeyaa saridda, dilaacinta (Sunaha 1aad) ama goynta kintirka iyo/ama dibinta, iyada oo la isku tolayo dabinta iyo kintirka, dab-ku-goynta kintirka iyo unugyada ku hareeraysan, iyada oo laga saarayo unugyada jidhka ee ku hareeraysan saxaaxa ibtiisa oo loo yaqaan (goynta Angurya) ama googoynta saxaaxa oo loo yaqaan (googooynta gishiri)iyada oo la marinayo walxo isku dhajiya ama dhir saxaaxa si looga sii daayo dhiig, iyada oo ujeedadu tahay in la yareeyo – iyo hab kasta oo kale oo hoos yimaadda qeexitaanka xagga sare lagu sheegay. (Momoh Comfort – Royal College of Nursing 2006)

### 1.4.1. Sababaha loo Sameeyo Gudniinka Hablaha waxaa ka mid ah:

1. In la yareeyo (xakameeyo) rabitaanka gabdhaha ee dhinaca jinsiga (ka hortag galmo).
2. Caddeynta bikranimada gabadha guurka ka hor, iyada oo la daboolayo (xidhayo) saxaaxa, si looga hortago galmo guurka hortii la sameeyo.
3. In la guto waajib diini ah, gaar ahaanna Muslimiinta, iyada oo si qaldan loo aamminsan yahay in Gudniinku yahay shardi diini ah, iyo in laga xalaaleeyo gabadha oo la daahiriyo nafteeda.
4. Aqoonsi dhaqan-bulsheed, si gabadhu u bilawdo dumarnimo, dadka u dhexgasho una hanato isku xidhnaanta bulshada.
5. Hab-dhaqan carruurnimada lagu soo maro looguna gudbo dumarnimo, sidaa darteedna gabadha loo diyaariyo mid la guursan karo,

6. In dumarka la dhadigeeyo, bulshooyinka qaar baa aamminsan in qaybo ka mid ah xubinta taranka ee haweenayda ee soo taagani in ay yihiin calaamad labnimo, sidaa darteedna loo baahan yahay in laga jaro, si dhadignimadeedu u dhammaystirnaanto

7. In dumarku dhawrsoonaadaan, nadiif iyo daahirna noqdaan, meelaha laga aamminsan yahay in xubnaha taranka ee dumarku ay yihiin qaar aan arag iyo nadaafad midna lahayn.

8. Caafimaad ahaan, iyada oo la aamminsan yahay in ay kor u qaadayso dhalmada iyo badbaadada ilmaha.

### 1.4.2. Saamaynta Gudniinka Hablaha

**a) Xaaladaha caafimaad ee deg-dega ah ee uu keeno Gudniinka Habluhu:**

- Dhiig-bax, xanuun, dawakhaad/miyir doorson,
- Nabarka oo caabuqa, sumow dhiiga ah oo uu keeno caabuq, teytano,
- Kaadida oo qofka ku dhegta/dhibta.
- Dhaawac kuyimaadda xubnaha kale, (tusaale: isku furan saxeexa iyo kaadi haysta).
- Halis uu ugu jiro in jidhka uu soo galo jeermis tusaale bakteeriya ama caabuqa HIV/AIDS oo ay keentay qalab la isticmaaley oo aan si buuxda jeemiska looga dilin,
- Ilaa iyo heer Dhimasho (geeri),

**b) Dhibaatooyinka muddada dhexe ee uu keeno Gudniinka Hablaha:**

- Nabarka oo aan bogsan,
- gunaad, iyo caadada oo gubta (surati), ama ku istaagta
- Caabuq ku dhaca obocda dumarka/hablaha (sida kaadi-haysta, makaanka iyo xubnaha kale)
- xidhan ku yimaada socodkii kaadida, ama kaadida oo ku is taagta,
- Caabuq kaadi-mareenka ku dhaca;

**(c) Dhibaatooyinka Caafimaad ee Gudniinka ee Muddada Dheer:**

- Salaw nafsiyeed iyo riyo salal leh,
- Xanuun dhimirka ah oo dhibta ka dib yimaada,
- Aaminaad darro iyo hubaal la’aan xidhiidh, gaar ahaan xubnaha qoyska ee ugu dhadhaw
- Saxaaxii oo awdma qodobkii lagu sameeyey labada dhinac ee saxaaxa ee midba in laga jarey dartii,
- Fiix biyood ku samaysanta diirka hoostiisa,
- Dareen-wade la jarey oo xanuun joogto ah ku keena,
- Xanuun ama caabuq daba dheeraada,
- Caabuq kaadi mareenka ku yimaada iyo kalyaha oo dhibi soo gaadho,
- Khilaaf qoys oo dabo-dheeraada, si dhib yarna aan ku xallismin
- Madhaleysnimo ka timid xanuunadii ku dhacey miskaha xubnaha ku jira, iyo xubinti(dhuuntii) taranka oo xidhantey,
- Foosha oo ku dheeraata ama ku adkaata oo ka timid gunaad adkaaday oo samaysmay xiligii la guday,
- Inta u dhaxaysa saxaaxa iyo dabada oo dhibi soo gaadho (perineum), Makaanka oo ururiwaaya xiliga dhalmada, makaanka oo qarxa, dhimasho ilmaha iyo hooyada,
- Isku-furan ku dhaca foosha ku adkaatay darteed.

## 1.5. Aragtida Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland ee Gudniinka Hablaha

Aragtida qaranka ee ku aaddan Gudninka hablahu/dumarku waxa ay waafaqsan tahay, Diinta Islaamka, Dastuurka Somaliland iyo xeerarka caalamiga ah, waxa ay ka soo horjeeddaa googoynta, jeexjeexista, sarsarista iyo toltolista xubinta taranka ee dumarka/hablaha, iyada oo aan loo samaynayn sababo caafimaad oo dhaktar caddeeyay. Gudniinka habalaha & jar-jaridda xubnaha taranka Gabdhaha oo loo aqoonsan yahay jidhdil ku dhisan takoor jinsi, hoos u dhig sharafeed oo ku salaysan xiqdi iyo kala sarayn jinsi, Qur'aan kana laguma hayo hal aayad oo ogol ku dhaqanka caadada Gudniinka Hablaha ee dunidu u aqoonsan tahay halis caafimaad, nafsi, iyo mid bulsheed oo sal-balaadhan, isla markaana ku faaftay bulsho weynta Adduunka, gaar ahaan ta Afrikaanka ah.

Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland oo mabaadii'diisa aas'aasiga ahi yihiin diinta Islaamka, sida uu sheegaayo Qodobka 5aad (DIINTA) farqadihiisa 1aad, 2aad, iyo 3aad (Dastuurka Jumhuuriyadda Somaliland), Qodobka 10aad:XIDHIIDHKA DIBEDDA, farqaddiisa; 1aad, iyo 2aad, Qodobka 24aad:XAQA NOLOSHA, NABAD GALYEYNTA JIDHKA, XURMAYNTA MAGAC-SAMIDA IYO DAMBIYADA LAGA GALO XUQUUQDA AADAMIGA, farqaddiisa 1aad, 2aad, 3aad, iyo 4aad, iyo Qodobka 36aad: XUQUUQDA HAWEENKA, farqaddiisa; 1aad, iyo 2aad, qodobadan kor ku soo xusan waxa ay reebayaan caadaysiga Gudniinka & jar-jaridda jidhka hablaha/dumarka, isla markaana waxay waajibinayaan in xeerar ka dhan ah laga soo saaro caadooyinka dhibaatada ku ah jidhka, caafimaadka, sharafta iyo nolosha Aadamaha, gaar ahaan kuwa dumarka/hablaha, taasina waxa ay innagu qasbaysaa qaran ahaan, in aynnu la nimaadno farsamooyinkii iyo xeeladihii aynnu wax uga qaban lahayn Gudniinka Hablaha, ugu dambayntana aynnu ku joojin lahayn Gudniinka hablaha.

Yoolasha Waara, ee 17 ka ah (2015-2030), yoolkiisa 5aad; Gaadhida Sinnaan iyo Awoodsiinta Dumarka iyo Hablaha, qaybtiisa 3aad: Joojinta Caadooyinka ku dhisan waxyeellada; sida tacaddiyada carruurta, guurka qasabka ah iyo Gudniinka gabdhaha, isna waxa uu innagu hagayaa in siyaasado, xeerar iyo habraacyo laga soo saaro sidii loo xakamayn lahaa, isla markaasna loo cidhibtiri lahaa Gudniinka Hablaha

Aragtida Qaranka ee ku aaddan Gudniinka Hablaha waxaa saldhig u ah, isla markaasna hagaaya Dastuurka Jamhuuridda Somaliland oo isna mabaadiidiisa aas'aasiga ahi ka shidaal qaataan Diinta Islaamka iyo xeerarka iyo heshiisyada caalamiga ah ee dhawraya xuquuqda Aadamaha, kuwa ilaalinaaya sinnaanta, isla markaasna ka dhanka ah faquuqa, wax yeellaynta sumcadda, jidhka, caafimaadka, nafsadda, iyo dareenka qofka Bani'aadanka ah (Dastuurka Jamhuuriadda Somaliland: Qodobbada; 10aad iyo 36aad).

Sidaa, darteed, SIYAASADDA GUDNIINKA HABLUHU waxa ay ka soo horjeeddaa dhammaan: Goynta, Jeexista, Tolista, Xidhxidhista iyo waxkasta oo wax yeellaynaaya xubinta taranka hablaha/dumarka guud ahaan ba, oo aan sababo caafimaad loo samayn, iyada oo la tixraacaayo sida ay diinta islaamku u ilaalisay Aadamaha, mabaadiida xuquuqal iinsaanka, iyo xeerarka madaniga ah ee dalka u yaalla.

## CUTUBKA 2 AAD

## 2. Dastuurka iyo Xeerarka La xidhiidha Gudniinka Hablaha

### 2.1.Dastuurka Somaliland

*Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobkiisa 10-aad oo ka hadlaya "xidhiidhka dibadda" farqaddiisa koowaad waxa ay dhigaysaasidan "…Waxa ay dhawraysaa dhammaan heshiisyada iyo mucaahadooyinka ay dawladdii hore ee Soomaalidu la gashay dawlado shisheeye ama shirkado iyada oo ay shardi tahay in aanay ka hor iman danaha iyo rabitaanka Jamhuuriyadda Somaliland", halka Farqadda 2aad dhigayso "Jamhuuriyadda Somaliland waxa ay aqoonsan tahay,isla markaana ku dhaqmaysaa Axdiga Qaramada Midoobay iyo Sharciga Caalamiga ah, waxayna tixgelinaysaa Baaqa Caalamiga ah ee Qaramadda Midoobay ee 1948kii."*

Waxa intaa dheer, Qodobka 36^aad^oo ka hadlaya "Xuquuqda Haweenka" waxa uu dhigayaa, "Jamhuuriyadda Somaliland waxa ay dhiirrigelinaysaa, sharcina ka soo saari doontaa, xuquuqda haweenka in ay ka xoroobaan dhaqammada Shareecada kasoo horjeeda dhibkana ku ah naftooda iyo sharaftooda."Sidaa darteed, dawladda Jamhuuriyadda Somaliland iyada oo raacaysa Dastuurka dedaalna ugu jirta hubinta iyo ilaalinta Xuquuqda Aadamaha waxa ay dhaqan galinaysaa Siyaasadda Joojinta Gudniinka Habalaha.

### 2.2. Xeerarka caalamiga ah

Gudniinka Hablaha waxa caalami ahaan loo aqoonsan yahay in uu xadgudub ku yahay xuquuqda dumarka iyo hablaha. Bulshada caalamku waxa ay ansixiyeen dhawr heshiis/mucaahado, si loo hubiyo dhawrista hablaha iyo dumarka laga ilaalinayo gudniinka. Nasiib darrase dhammaan dawladuhu saxeexayaal kama aha heshiisyadani/mucaahadooyinkani. Heshiisyada iyo mucaahadooyinkani waxa ka mid ah:

i. Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Carruurta 1989.
ii. Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Madani iyo Siyaasadeed.
iii. Heshiiska caalmiga ah ee xuquuqaha dhaqaale, bulsho iyo dhaqan.
iv. Heshiiska caalamiga ah ee ka-dhanka ah Midab Takoorka.
v. Heshiiska Caalamiga ah ee ka Dhanka ah Jidh-dilka.
vi. Axdiga Xuquuqda Aadamaha ee Afrika.
vii. Axdiga Afrika ee Xuquuqda iyo Daryeelka Ilmaha, 1990.
viii. Heshiiska Axdiga Afrika ee Xuquuqda Dadka iyo Dumarka ee Afrika.

Jamhuuriyadda Somaliland waxa qabanaya dhawr mucaahado iyo axdi.Waxaa ka mid ah "Mucaahadada Caalamiga ah ee ka dhanka ah Jidh-dilka, iyo Xaaladaha Kale ee si xun ula dhaqanka, bahdilka ama Ciqaabta" Jamhuuriyadda Somaliland waxa ay aqbashay "Mucaahaddada Caalamiga ah ee Xuquuqda Carruurta. Jamhuuriyaddii Somaliland sidoo kale waxa ay ogoshahay "Axdiga Afrika ee Xuquuqda Bani'aadanka iyo Dadka. Iyo"Axdiga Afrika ee Xuquuqda iyo Daryeelka Ilmaha."

Heerka Qaran, Dastuurka Qaranka ee (2001) dii Dawladda Somaliland waxa ay isku waajibisay in ay dhawrto Xuquuqda Dumarka. Qodobka 36^aad^: "Xuquuqda Haweenka" Farqada 1aad waxa ay dhigaysaa: "Xuquuqda, xorriyaadka iyo waajibaadka Dastuurku xaqiijiyey, haweenku ragga way ula siman yihiin, wixii Shareecadda Islaamka midkood u gaar yeeshay mooyaane." Waxa kale oo uu dhigaysaa farqada 2aad:

"Xukuumaddu waa in ay dhiirri-gelisaa Xeerna ka soo saartaa xaqa ay haweenku u leeyihiin in ay ka xoroobaan dhaqamada aan Shareecadda waafaqsanayn ee waxyeelada u leh jidhkooda iyo damiirkooda.

Iyada oo la fulinayo balanqaadka dawladda ee ah in la dhawro Xuquuqda Aadamaha, bishii 27aad ee June 2011kii, Golaha Wakiiladu waxa ay ansixiyeen magacaabista Xubnaha Komishanka Xuquuqal Insaanka.Taasi waxa daba socotay saxeexii Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland "Xeerka Komishanka Qaranka ee Xuquuqal Insaanka Somaliland Xeer Lr. 39/2010." dedaalada socda ee ah in la dhawro Xuquuqda dumarka iyo carruurta, waxa la ay Dawlada Somaliland ka dhigi doontaa Xeer ka dhan ah Gudniinka Hablaha.

### 2.3. Dejinta Xeerka Joojinta Gudniinka Hablaha

Si loo sugo isla markaana loo xaqiijiyo qorshaha joojinta Gudniinka Hablaha siyaaasaddu waxa ay waajibinaysaa, isla markaana jidaynaysaa in la sameeyo XEER CIQAABEED ka dhan ah GUDNIINKA HABLAHA oo waafaqsan shareecada islaamka, Dastuurka Somaliland iyo mabaa'diida guud ee heshiisyada caalamiga ah ee la xidhiidha bed-qabka jidhka, caafimaadka iyo xuquuqaha dumarka/hablaha oo lagu beegsanayo sidii loo cidhib-tiri lahaa Gudniinka Hablaha. Samaynta Xeerka Joojinta Gudniinka Hablaha ee Somaliland, waxaa hagidoona qorsha hirgalinta iyo fulinta siyaasaddan, ee joojinta iyo chibibtirka Gudniinka Hablaha ee Somaliland.

### 2.4. Awoodda Curinta Xeerka Joojinta Gudniinka Hablaha

Wasaaradda Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoysku iyada oo kaashanaysa Hay'adaha dawaladda oo ay ugu horeyso wasaaradda diinta iyo awqaafta iyo daneeyayaasha kala duwan ee Gudniinka Hablaha, waxa ay curinaysaa Xeer-Ciqabeed ka farcamaya Siyaasaddan, xeerkaas oo jidaynaya in la raaco tallaabooyinka laga qaadayo dhinacyada u hoggaansami waaya nuxurka guud ee siyaasadda.
markaasna loo daweyo raaddadka caafimaad ee uu kaga tago Gudniinku dumarka/hablaha marxaladnololeed kasta.
Diwaangalinta dhacdooyinka, kaydinta habraacyada dhibaatooyinka gudniinku gaysto iyo tabaha xallinta mushkiladaha Gudniinka hablahu wax ay wax wayn ka tari doontaa cilmibaadhisyada rasmiga ee lagu samayn doono Gudniinka Hablaha/Dumarka.
Heerbegsiga waxaa la waafajinayaa xeerarka u yaala xuquuqda Aadamaha ee ka dhanka ah tacaddiyada lagula kaco habalaha iyo haweenka oo ay ku jirtu xuquuqda carruurta. In shaqaalaha cafimaadka lagu tababaro lataaclida dhibaatooyinka uu ku keenay gudniinku hablaha iyo dumarka.

## CUTUBKA 3AAD

## 3. YOOLKA, UJEEDDOOYINKA IYO DANTA LAGA LEEYAHAY SIYAASADDA

Yoolka Guud ee Siyaasadda Gudniinka Hablahu waa joojinta caadada gabowday ee googaynta, toltolista, sarsarista, xubinta taranka hablaha/dumarka ee aan waafaqsanayn diinta Islaamka. sannadda 2030, iyada oo la sugayo xuquuqda aas'aasiga ah ee dumarka iyo hablaha. Yoolka iyo higsiga Siyaasadda Gudniinka Habluhu waa bulsho ka fayow dhammaan caaddoyinka xunxun ee ka dhanka ah dumarka (Gudniinka Hablaha), iyo in ay dawladda Somaliland u suurto geliso, iyada oo ay hagayso Wasaaradda Shaqogelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoysku, qoraal

jaangoyneed oo tixraac ah oo loo adeegsado hawlaha xallinta iyo dawaynta saamaynaha taban ee Gudniinka Habalaha, ka hortagga iyo xakamaynta iyo joojinta dhaqan-caadeedka xun ee lagula kaco dumarka/hablaha ee sida daran ugu faafay dalka Jamhuuriyadda Somaliland. Qoraal jaangoyneed ahaan, jihayntani waxa ay xadidi doontaa arrimaha ahmiyadda mudan, qorshe-hawleedka iyo talo-bixin ku aaddan xakamaynta Gudniinka Hablaha.

### 3.1. Ujeeddooyinka Siyaasadda Gudniinka Hablaha

Ujeedddooyinka Siyaasadda Gudniinka Habluhu waa

- In la suurto galiyo tabo, xeelado iyo habraacyo qaran oo ku dhisan cilmi-baadhis iyo waayo-aragnimo iyo xeel-dheerinimo oo leh heerbeegyo cayiman.
- In la dhiirigaliyo ka qaybgalka qaybaha dadweynaha iyo kobcinta aqoonta guud iyo garaadka dadka ee Gudniinka Hablaha iyo saamaynta taban ee uu ku leeyahay dhinacyada nolosha.
- In la hirgaliyo barmaamijyo cilmi-baadhiseed iyo diiwaan qarameed salbalaadhan oo lagu ururiyo, kaydiyo, isla markaasna lagu tirakoobo dhacdooyinka la xidhiidha Gudniinka Hablaha, si loo sugo xogaha rasmiga ah ee xaaladdaha iyo heerka uu marayo Gudniinka Habluhu.
- In la isku dubba-rido, la mideeyo, la is-ogolaysiiyo, isla markaana la hago, lana hoggaamiyo barmaamijyada iyo adeegyada wax lagaga qabanaayo Gudniinka Hablaha ee ku jahaysan joojinta iyo cidhibtir ka Caadada Guddida Habalaha Jamhuuridda Somaliland.
- In ay cayinto doorarka kala duwan ee hawl-gallada daneeyayaasha kala duwan ee gudniinka hablaha;
- In la xakameeyo dhammaan hawlaha dhiirrigalinaya, fududaynaya ama sahlaya gudniinka hablaha
- In ay kormeerto, dushana kala socoto habsami u socodka barmaamijyada iyo hawlaha ku wajahan joojinta iyo joojintajoojinta Gudniinka hablaha, isla markaasna xal u raadiso dhibaatooyinka lama filaan ka ah ee ka dhalan kara, hawlgallada ka dhanka ah Gudniinka hablaha.
- In ay jaan-goyso qorshayaaasha lagu jihaynayo joojinta Gudniinka Hablaha;
- In ay keento Qorshe Hawleed ku saabsan sidii Somaliland u cidhibtiri lahayd Gudniinka Hablaha, iyada oo la unkaayo, isla markaana, la dhaqan galinaayo xeer qaran oo ka dhan ah Gudniinka Hablaha, si caadadaas loo joojiyo, isla markaana loo cidhintiro dhammaanteedba mustaqbalka dhaw(2030).

### 3.2. Danta Laga Leeyahay Siyaasadda

Danta laga leeyahay Siyaasadda Gudniinka Habluhu waa: “Dedejinta in si buuxda Jamhuuriyadda Somaliland u joojiso Gudniinka Hablaha”.

### 3.3.1 Higsi

Bulshada Somaliland oo dumarka iyo habluhu ay si buuxda u helaan xuquuqdooda caafimaad iyo ta Bani’aadnimo, iyo dhawrsanaanta jidhkooda si waafaqsan diinta islaamka marka la gaadho 2030.

### 3.4. Natiijada Laga Filanayo Siyaasadda Gudniinka Hablaha

Natiijda laga filanayo siyaasaddan waa inay:

i. Ay u gogol xaadho curinta iyo dhammaystirka xeerka dambiyaynta Gudniinka hablaha

ii. Caddayso fahanka, falsafadda iyo aragtida rasmiga ah ee qaranku ka leeyahay Gudniinka Hablaha.

iii. Jidka u jeexdo qorshihii lagu joojin lahaa, isla markaana lagu cidhibtiri lahaa Gudniinka Hablaha.

iv. In ay xaqiijiso doorarka kala duwan ee shaqo-wadaagayasha Joojinta Gudniinka Hablaha.

v. In ay jaangoyso, isla markaana jaangoyso siyaasadaha (Internal policies), Barmaamijyada iyo adeegyada ku jahaysan Gudniinka Hablaha

vi. In ugu dambaysta laga cidhibtiro arlada Somaliland ku dhaqanka caadada Gudniinka gabi ahaan ba

## 3.5. Mudnaan-Siinta Siyaasadda

Siyaasadda Gudniinka Hablahu waxa ay mudnaanta siinaysaa qorshaynta iyo sal u dhigidda sidii loo midayn lahaa dedaallada lagu cidhib-tirayo gudniinka hablaha

### 3.5.1. Ujeeddooyinka Siyaasadda Gudniinka Hablaha ee Somaliland

1. Ujeedka KOOWAAD: In la suurto galiyo tabo, xeelado iyo habraacyo qaran oo ku dhisan cilmi-baadhis iyo waayo-aragnimo iyo xeer-dheerinimo oo leh heerbeegyo cayiman

   **Mudnaansiinta 1AAD**.

   - Samaynta iyo hirgalinta Qorshaha Fulinta ee Siyaasadda Joohinta Gudniinka Hablaha ee Somaliland.
   - Samaynta iyo hirgalinta habraac leh heerbeegyo la hubiyay oo lagu wadaago xogaha la xidhiidha falalka Gudniinka Hablaha (referral system)

2. **Ujeedka LABAAD**: In la dhiirrigaliyo ka qaybgalka qaybaha dadweynaha iyo kobcinta aqoonta guud iyo garaadka dadka ee Gudniinka Hablaha iyo saamaynta taban ee uu ku leeyahay dhinacyada nolosha. (Wacyigalin bulsho/Community mobilization and FGM community education at community level)

   **Mudnaansiinta 2AAD**.

   - In la dhiso aqoonta iyo wacyiga dumarka iyo dhallinyarada ee Gudniinka Hablaha iyo arrimaha la xidhiidha, si loo joojiyo, isla markaasna loo cidhibtiro Gudniinka
   - In la taageero ku luglahaanshaha Joojinta Gudniinka Hablaha ee Madaxdhaqameedka. ( To encourage traditional leadership engagement in FGM eradication process)
   - In la taageero, isla markaasna la abaabulo dadka saamaynta leh sida siyaasiyiinta, gaar ahaan kuwa dumarka ah, si ay qayb uga noqdaan joojinta Gudniinka Hablaha ( To support and encourage the involvement of great activists and privilege people in FGM ending mission)

3. **UjeedkaSADDEXAAD**: In la hirgaliyo barmaamijyo cilmi-baadhiseed iyo diiwaan qarameed sal-balaadhan oo lagu ururiyo, kaydiyo, isla markaasna lagu tirakoobo dhacdooyinka la xidhiidha Gudniinka Hablaha, si lo sugo xogaha rasmiga ah ee xaaladdaha iyo heerka Gudniinka Hablaha

   **Mudnaansiinta 3AAD**.

- Wada shaqaynta iyo taageeridda jaamacadaha iyo goobaha kale ee lagu sameeyo cilmibaadhis si xog rasmi ah oo ku dhisan caddaymo-sayniseed loogu go'aan qaato, si loo joojiyo, isla markaana loo cidhibtiro Gudniinka Hablaha.
- In kor loo qaado xirfadda cilmibaadhista iyo xog ururinta ee Hay'addaha iyo wakaaladaha dawliga ah sida qaybta cilmibaadhista ee Wasaaradda Shaqo-galinta, Arrmaha Bulshada iyo Qoyska.
- In la maalgaliyo, isla markaana miisaaniyad qaran oo waafi ah loo helo cilmibaadhista iyo xog ururinta arrimaha la xidhiidha Gudniinka Hablaha.

4. **UjeedkaAFRAAD**: In la isku dubba-rido, la mideeyo, la is-ogolaysiiyo, isla markaana la hago, lana hoggaamiyo barmaamijyada iyo adeegyada wax lagaga qabanaayo Gudniinka Hablaha ee ku jahaysan joojinta iyo cidhibtir ka Caadada Guddida Habalaha Jamhuuridda Somaliland

   **Mudnaansiinta 4AAD**.

   - Isku duwidda iyo isku dubbo-rididda hawlaha wax lagaga qabanaayo Gudniinka Hablaha si loo joojiyo, isla markaasna loo cidhibtiro.
   - Midaynta iyo is-ogolaysiinta adeegyada iyo barmaamijyada Gudniinka Hablaha wax loogaga qabanaayo, si kor loogu qaado tayada adeegyada iyo barmaamijyada lagu joojinaayo, laguna cidhibtiraayo Gudniinka Gabdhaha.
   - Hagidda iyo hoggaaminta ololayaasha ka dhanka ah Gudniinka hablaha ee qaran, iyo mid bulsho, si dedaalka loogu jiro Joojinta Gudniinka Hablaha looga gaadho natiijo wax ku ool ah.
   - Isku dibboriddida iyo jangoynta hawl kasta oo wax looga qabanaayo joojinta iyo cidhibtiridda Gudniinka Hablaha Jamhuuriyadda Somaliland.

5. **UjeedkaSHAN AAD**: In ay cayinto doorarka kala duwan ee hawl-gallada daneeyayaasha kala duwan ee ee joohinta gudniinka hablaha;

   **Mudnaansiinta 5AAD**.

   - Jahaynta iyo jaagoynta doorarka hay'addaha qaran ee ku lugta leh la dagaallanka Gudniinka Hablaha.
   - Ciyimidda iyo hagista nooc-hawleedyada iyo goob-hawlgaleedyada hay'addaha caalamiga ah iyo kuwa maxalliga ah ba.
   - Jaangoynta nooca barmaamij/adeeg ee haayad/ama wakaalad ay ka qabanayso arriamaha Gudniinka Hablaha Jamhuuriyadda Somaliland.
6. **Ujeedka LIXAAD:** In la xakameeyo dhammaan hawlaha dhiirri-gelinaya, fududaynaya ama sahlaya Gudniinka hablaha

   **Mudnaansiinta 6AAD.**

   - Curinta, falkinta iyo soo saarista xeer-ciqaabeed lagu joojinaayo, isla markaana lagu cidhibtiraayo Gudniinka Hablaha Somaliland.
   - Wacyigalinta iyo waxka beddelka maskaxda dadka ku lugta leh samaynta caadada Gudniinka Hablaha iyo dhammaan xooggaga dabada ka riixaaya samaynta Gudniinka hablaha.
   - Adeegsiga caddaaladda iyo nidaamka dawliga ah, si wax looga qabto falalka la xidhiidha Gudniinka Hablaha.

7. **UJeedkaTODOBAAD:** In ay kormeerto, dushana kala socoto habsami u socodka barmaamijyada iyo hawlaha ku wajahan joojinta Gudniinka hablaha, isla markaasna xal u raadiso dhibaatooyinka lama filaan ka ah ee ka dhalan kara, hawlgallada ka dhanka ah Gudniinka hablaha.

   **Mudnaansiinta 7AAD**

   - Qaybka ahaanshaha dejinta iyo nashqadaynta adeegyada, barmaamiyada iyo mashaariicda wax lagaga qabanaayo arrimaha la xidhiidha Gudniinka Hablaha si loo joojiyo ugu dambayntana loo cidhibtiro.
   - Jaangoynta, jahaynta iyo hagidda hawlaha lagu joojinaayo, isla markaana lagu cidhibtiraayo Gudniinka Hablaha Somaliland.
   - Ka fekerka, kormeeridda, qiimanta iyo xal u raadinta arrimaha lama filaanka ah ee soo baxa inta lagu jirohawlgalka joojinta iyo cidbibtirka Gudniinka Hablaha, Somaliland.

8. **UjeedkaSIDDEEDAAD:** In ay jaan-goyso qorshayaaasha lagu jihaynayoSiyaasadda Gudniinka Hablaha;

   **Mudnaansiinta 8AAD.**

   - Dejinta qorshaal qaran oo lagu joojinaayo Gudniinka hablaha wakhti cayiman oo la isla garanaayo.
   - Hirgalinta iyo fulinta qorshe ku dhisan wada-tashi iyo cilmibaadhis oo leh oddoros maaliyadeed.
   - Abuuridda dakhli iyo ilo maaliyadeed oo u gaar ah la dagaallanka Gudniinka Hablaha Jamhuuriyadda Somaliland.

9. **Ujeedka SAGAALAAD**: In ay keento Qorshe Hawleed ku saabsan sidii Somaliland u cidhibtiri lahayd Gudniinka Hablaha, iyada oo la unkaayo isla markaana, la dhaqan galinaayo xeer qaran oo ka dhan ah Gudniinka Hablaha, si caadadaas loo joojiyo, isla markaana loo cidhibtiro dhammaanteedba mustaqbalka dhaw.

   **MUDNIINSIINTA 9AAD**

   - Aas'aasidda Guddiga heer qaran ee joojinta Gudniinka Hablaha.
   - Samaynta Guddiyda Heer Gobal ee joojinta Gudniinka Hablaha.
   - Dhisidda Guddiga sare ee farsamo ee joojinta Gudniinka Hablaha, Somaliland.
   - Samanta, hirgalinta, iyo dhaqan galinta xeerka qaran ee joojinta Gudniinka Hablaha Somaliland.
   - Kor u qaaddida caddaalada iyo awoodsiinta dumarka iyo hablaha, si loo joojiyo isla markaana loo cidhibtiro Gudniinka Hablaha Somaliland

## CUTUBKA 5AAD

## 4. Tirarka Fulanta Siyaasadda

Si loo joojiyo, isla markaana loo cidhibtiro dhaqammada la xidhiidha gudniinka hablaha, isla markaana daneeyayaaasha kala duwan doorkooda u gutaan, iyaga oo fulinaya waajibaadyadooda kala duwan si habsami leh, isla markaana ka qayb qaadanaya guud ahaan wajibaadka u gaarka ah, waxay siyaasaddani dejinaysaa mabaa'dii sugan oo lagu xakamaynaayo googoynta, sarsarista, iyo mudmudista xubinta taranka ee hablaha/dumarka oo faah-faahinaya hab kasta oo lagu xoojinayo dedaallada lagu joojinaayo, isla jeerkaana lagu cidhibtirayo gudniinka hablaha, waxa kale oo

mabaa'diida siyaasaddan lagu dejiyay noqonayaan kuwa hagaya qorshayaasha lagu beegsanayo in lagu joojiyo guud ahaan dhaqan kan iyo hageyaasha ka dheegmaya siyaasaddan ee loo raacayo laguna salaynayo joojinta caadadan xun.

## 4.1. Mabda'a 1aad

### 4.1.1 Tiirka 1aad: Wacyigelinta Bulshada

Xukuumadu waxa ay abuuri doontaa deegaan saamaxaya, taageerada iyo suurto-gelinta wacyigelinta bulshada ee waa faqsandiinta Islaamka iyo xeerarka caalamiga ee Gudniinka Hablaha, kaas oo ah ku xad-gudub xuquuqda dumarka iyo hablaha, saamaynta caafimaad ee Gudniinka Hablaha iyo cawaaqibka sharci ee ka dhalanaya falalka ku lugta leh Gudniinka Hablaha.

**Hannaanka Guud ee loo marayo Wacyi-galinta Bulshada**

Waxa ka mid ah:

- In ay door muhim ah ka ciyaarto dhammaan wacyigelinta bulshada kaas oo ay fulinayaan jilayaasha kala duduwan ee ololaha cidhib-tirka Gudniinka Hablaha.
- In la diyaariyo khayraadka lagama maarmaanka ah ee ololaha wacyi-gelinta ururrada bulshada, hay'adaha xukuumadda, kuwa diinta, iyo jilayaasha ay khuseyso ee kale.
- In la bixiyo warbixin cusub, oo mudaysan kuna saabsan saamaynta caafimaad ee uu Gudniinku leeyahay, mawqifka Islaamka ee Gudniinka Hablaha, dhinaca sharciga iyo xuquuqda aadamaha ee Gudniinka Hablaha dhammaan ka faa'iideystayaasha iyo daneeyayaasha dalka guud ahaan.

### 4.1.2 Mabda'a 2aad: Cilmi-baadhis

Si loo helo xogo sugan oo rasmi ah, Xukuumaddu waxa ay taageeri doontaa cilmi baadhis taas oo bixin doonta xog sugan oo waqtiga la jaanqaadaysa kuna saabsan saamaynta caafimaad, bulsho iyo dhaqaale ee Gudniinka Habluhu uu leeyahay si ay wargelin u siiso fulinta siyaasada.

Xukuumaddu waxa ay taageeri doontaa isla markaana fududeyn doontaa:

- In la sameeyo daraasad lafa-gurta Xaalada Gudniinka Hablaha ee Somaliland, inta aan la samayn wax-qabad.
- In cilmi baadhis lagu sameeyo saamaynta caafimaad, bulsho iyo dhaqaale iyo raadka uu kaga tago Gudniinka Habluhu.
- In la bilaabo baadhitan xogo dheeraad ah si loo fahmo caadadan qotoda dheer si loo keeni karo xalal wax ku ool ah.
- In la sameeyo daraasad ku saabsan baahiyaadka, si loo cayimo ahmiyadaha kala duwan ee bulshada dhexdeeda, si loo fudeediyo hab ku dhisan mashruuc isku dhan oo ku saabsan hawl-qabadka Gudniinka Hablaha, iyada oo la waafajinayo wax-qabadka Gudniinka Hablaha baahiyaadka bulshada.

### 4.1.4 Mabda'a 3aad: Waxbarashada Diinta ee Gudniinka Hablah

Xukuumaddu waxa ay sii wadi doontaa taageerada ay siinayso ololaha joojinta Gudniinka Hablaha, waxa ay ku fidin doontaa isla markaana xoojin doontaa dhammaan lixda gobolee Somaliland, sidoo kalana waxa

ay ku soo dari doontaa waxbarasho Diini ah wacyigelinta Gudniinka Hablaha. Nuxurka gaarka ah ee siyaasada xukuumadu:

- Waxa ay awood dhisid iyo tabobar siin doontaa Sheekhyo badan iyo macallimiinta dugsiyada Quraanka, taas oo ku saabsan Wacyigelin, baraarujin iyo ololaha ka dhanka ah Gudniinka Hablaha.
- Waxa ay siin doontaa qalab xafiis, kuwaas oo ay ku jiraan Kombiyuutaro iyo qalabdaabacadeed, iskaanaro iyo qalabka xaashiyaha sawira (photocopy) Wasaarada Diinta iyo Awqaafta si ay u fududeyso wax-qabadka Culimada.
- Waxa ay siin doontaa gaadiid Wasaarada Shaqo-galinta, Arrimaha Bulshada & Qoyska iyo Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta si ay la socod iyo kormeer ugu yeeshaan hawlaha iyo dedaallada ka dhanka ah Gudniinka Hablaha ee ka socda lixda gobol.
- Waxa ay ka taageeri doontaa sheekhyada iyo macallimiinta dugsiyada Quraanka ee ku lugta leh ololaha wacyigelinta Gudniinka Hablaha.

**Wax-qabadka Muhimka ah**

- In la qabto doodo iyo aqoon isweydaarsiyo loo qabto hogaamiyayaasha dhaqanka, kuwaas oo ku saabsan Gudniinka Hablaha.
- In lagu wacyigaliyo, lanatababaro Sheekhyada iyo macallimiinta dugsiyada Quraanka ee deegaanada miyiga ah si loo joojiyo, isla markaasna loo cidhibtiro Gudniinka Hablaha ee Somaliland.
- In dugsiyada Quraanka lagu barto mawqifka diinta Islaamku ka qabto Gudniinka Hablaha.
- In la siiyo taagero awood dhisid ah Wasaaradda Shaqo-galinta, Arrimaha Bulshada & Qoyska iyo Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta si ay door firfircoon ugu yeelato ololaha qaran ee lagaga soo horjeedo Gudniinka Hablaha.
- In laga dhex bilaabo olole wacyigelineed culimada dhexdeeda, si ay u taageeraan dedaalka loogu jiro Joojinta iyo ciidhibtirka Gudniinka Hablaha

### 4.1.5 Mabda'a 5aad: Awoodsiinta Dumarka

Xukuumaddu waxa ay awoodsiin doontaa dumarka iyada oo siinaysa aqoon (xog ku saabsan Gudniinka Hablaha), dumarka wax guda oo la siiyo fursado shaqo oo kale xirfado iyo maaliyad/kheyraadka maaddi ah, dhibanayaasha gudniinkana la siiyo la talin cilmi nafsiyeed si loogu awoodsiiyo in ay dhammantood iska daayaan sancadaasi si hufana uga qayb-galaan ololaha Joohinta Gudniinka Hablaha Iyada oo loo marayo hannaankan:

**1.** In la taageero tababarka dumarka wax guda, iyada oo aqoon laga siinayo cawaaqibta xun ee Gudniinka Hablaha, laguna war galinaayo dhaqan galka iyo mabaadii'da aas'aasiga ah ee Siyaasadda Joojiinta Gudniinka.
**2.** Iyada oo lagala shaqeynayo ururrada caalamiga iyo maxalliga ah, in lagu dhiirigaliyo ka shaqaynta hawlaha la dagaallanka Gudniinka Hablaha, isla markaasna horseed ka noqdaan ololaha joojinta Gudniinka Hablaha.
**3.** In la suurtogeliyo tababarka ururrada dumarka hogaamiyayaashooda wacyigelinta ay sameeyaan ee ku saabsan arrimaha Gudniinka Hablaha, ololahajoojinta, lagana taageero in ay gaadhaan oo wacyigeliyaan bulshada dumarka ah guud ahaan.

**4.** In ay siiyaan niyad iyo kalsooni dhisid iyada oo la siinayo la-talin shakhsi ah iyo mid kooxeed, dhibanayaasha dumarka ah ee Gudniinka kuwaas oo la tacaalaya dhibaatooyin kala duwan; laguna tababaro arrimaha ka hortagga iyo xallinta Gudniinka Hablaha ah si loogu awood siiyo in ay noqdaan wacyigeliyayaal dadweyne oo ku saabsan ololaha joojinta.

### 4.1.6 Tiirka 6aad: Xidhiidhka Wada-shaqayneed iyo is-kaashiga caalamiga ah

Siyaasadda waxay jidaynayaa in dhammaan daneeyayaasha kala duwan ee cidhi-tirka gudniinka habluhu ay yeeshaan xidhiidh wada-shqayneed oo joogto ah iyada oo aan waxba loo dhimayn doorarka kala duwan ee daneeyayaasha u gaarka ah, siyaasaddu waxay sidoo kale ahmiyad weyn siinaysaa in dhammaan dadaallada lagu cidhib-tirayo gudniinka hablaha ay kaalin laxaad leh qaataaan daneeyayaasha caalamiga ahi

## CUTUBKA 5AAD

## 5. DOORARKA WADAAGAYAASHA

Maaddaama oo Gudniinka Habluhu yahay arrin muhim ah oo xagga lammaanaha ah, xidhiidhiyayaasha wasaaraddaha ku lugta lihi waxa ay door muhiim ah ka ciyaari doonaan in lagu daro Gudniinka Hablaha siyaasadaha waaxda iyo barnaamijyada ee hay’adaha ay khuseyso. Waxa ay ka qayb-qaadan doonaan isku dubba ridka iyo kulannada iskaashiga, si ay u wadaagaan qorshayaasha iyo guulaha ay gaadhaan wasaaraddaha ku lugta lihi, iyada oo doorka hoggaaminta ay yeelanayso Wasaaradda Shaqo-galinta Arrimaha Bulshada iyo Qoysku

### 5.1 Wasaaraadda Shaqa-Galinta Arrimaha Bulshada Iyo Qoyska (WSH,AB&Q):

1. In ay lacag ugu yaboohdo ololaha joojinta Gudniinka Hablaha,
2. In ay suurtogeliso kulannada isku-xidhka ee Gudniinka Hablaha, ee wasaaradaha kulugta leh, ururrada caalamiga ah iyo kuwa maxalliga ah.
3. In ay hogaamiso doodaha iyo u ololaynta joojinta Gudniinka Hablaha.
4. In la sameeyo barnaamij isku dhan oo ku saabsan siyaasadda Gudniinka Hablaha, kaas oo ay fulinayaan wasaarado kala duwan oo ku lug leh, iyada oo lala shaqaynayo ururrada bulshada rayidka ah. Waaxda Lammaanaha ee Wasaaradda Shaqo-Galinta, Arrimaha iyo Qoyska waxa ay ka masuul noqon doontaa hagitaanka iyo iskaashiga dhammaan mashaariicda Qaran ee Gudniinka Hablaha ku jahaysan
5. In ay warbixino kasoo ururiso wasaaradaha kala duwan ee ku lugta leh, iyo ururrada fulinaya, isla markaana ay diyaariyaan warbixin dhamaystiran oo Qaran oo ku saabsan Gudniinka Hablaha.
6. Iyada oo xidhiidh shaqo oo dhaw la yeelanaayo daneeyayaasha, Wasaaraddu waxay u howlgali doontaa in ay balaadhiso tababarka hogaamiyayaasha dhaqanka iyo ururrada maxalliga ah, iyada oo

la suurtogelinayo wada-hadallo-bulsheed iyada oo la kaashanaayo qaybaha kala duwan ee bulsho weynta Somaliland

### 5.2 Wasaaradda Arrimaha Gudaha:

1. In ay isku dubba-rido, kormeerto, isla markaana kasoo warbixiso qorshayaasha Gudniinka Hablaha ee ka socda lixda gobol, kalana qayb gasho kulannada isku-xidhka ah ee ay guddoomiso Wasaaradda Shaqo-galinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoysku
2. Iyada oo la kaashanayo Wasaaraddaha Warfaafinta iyo Cadaaladda, in ay samayso wacyigelin iyo baraarujin loo sameeyo Xeerka Gudniinka Hablaha, iyada oo loo marayo baahin lagu daabaco saxaafadda la qoro iyo saxaafadda electarooniga ah (websites ga iyo Raadiyaha).
3. In la taageero tabobarka saraakiisha booliska lagu tababarayo arrimaha Gudniinka Hablaha.
4. In la sameeyo wacyigelin bulsho dhammaan 6 da gobol ee dalka, iyada oo loo marayo xafiiska xidhiidhka booliiska, inta aan lasoo xidhin gabood falayaasha Gudniinka Hablaha.
5. Iyada oo iskaashi dhaw la leh Wasaaradda Caddaaladda in la soo xidho gabood falayaasha Gudniinka Hablaha, lana dhaqangeliyo Xeerka Gudniinka Hablaha.

### 5.3 Wasaaradda Caddaaladda:

1. In ay isku dubba-riddo, kana soo warbixiso dedaallada ka dhanka ah Gudniinka Hablaha ee lixda gobol ka socda, kana qayb gasho kulanka Iskaashiga ee bilaha ah ee ay Gudddoomiso Wasaaradda Shaqo-galinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoysku.
2. In ay taageerto tababarka saraakiisha dhawrista Xuquuqda carruurta, iyo shaqaalaha kale ee sharci ee ku lugta leh hawlaha Gudniinka Hablaha.
3. Iyada oo la kaashanaysa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Wasaaradda Warfaafinta iyo Ururrada Qareennada in la bilaabo Wacyigelinta xagga Sharciga iyo baraarujin ku saabsan faah-faahin sharci oo ku saabsan siyaasaadda, xayndaabka shuruucda goboleed iyo kuwa caalamiga ah iyo Dastuurka Qaranka, iyo Xeerka Gudniinka Hablaha, kaas oo u aqoonsan Gudniinka Hablaha ku-xadgudub xuquuqal Iinsaan oo ka dhan ah nolosha hablaha iyo dumarka.
4. In ay hubiso in gabadh kasta oo lagu sameeyo Gudniin in ay hesho cadaalad, si waafaqsan qodobada xeerka.

### 5.4 Wasaaradda Waxbarashada iyo Sayniska

1. In ay isku-dubba-riddo, kormeerto kana warbixiso hawlaha Gudniinka Hablaha ee ay Wasaaraddu ka waddo lixda gobol, kana qayb-gasho kulannada bilaha ah ee Gudniinka Hablaha, kaas oo ay gudoomiso Wasaaradda Shaqo-galinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoysku
2. In ay ku boorriso, isla markaana bilawdo hal todobaad oo joojinta Gudniinka Hablaha bisha Febraayo (Munaasibadda Caalamiga ah ee Gudniinka Hablaha) ee dhammaan dugsiyada hoose, sare iyo jaamacadaha. Todobaadka Gudniinku waxa uu halka ugu saraysa ee wacyi galineed gaadhi doonaa Lixda bisha Febraayo sannad kasta.
3. In ay taageerto tababarka macallimiinta iyo ardayda lagu tababarayo ka hortagga iyo wacyigalinta Gudniinka Hablaha.
4. In ay taageerto samaynta “Kooxaha JoojintaJoojinta Gudniinka Hablaha ee laga samayndoono Dugsiyada” taas oo ah hawl-qabad ka baxsan manhajka.

5. In ay boorriso, isla markaana taageerto in lagu daro manhajka waxbarasho la xidhiidha joojintajoojinta Gudniinka Hablaha ee dhammaan dugsiyada waxbarasho, taas oo ka bilaabmaysa dugsiyada hoose.
6. Iyada oo kaashanaysa Wasaaradda Dhallinyarada iyo ciyaaraha, in la kobciyo adeegsiga ciyaaraha, heesaha, riwaayaddaha iyo gabayada iyada oo laadeegsanaayo saxaafad si kor loogu qaado wacyigelinta Gudniinka iyo isku-baraarujinta cidhib-tirkiisa.
7. Wasaaradda waxbarashadu waxay soo bandhigi, lana wadaagi doontaa dhamaan daneeyeyaasha dhibaatada hablaha gudniinku u gaysto dhinaca waxbarshada, sannadkasta ugu yaraan hal mar ayaa la soo jeedin doonaa daraasad laxidhiidha inta xiisadood ee ay ka maqnaato inanta gudani iyo sababaha ugu weyn ee kaana dib u dhaca waxbarasho ee hablaha dhinaca gudniinka

## 5.5 Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka:

1. In ay taageerto kulannada iyo tabobarrada la siinayo umulisooyinka, umuliso dhaqameedka, kalkaalisooyinka sameeya, iyo dumarka arrimaha dhaqanka ku lugta leh, si loogu awood siiyo in ay noqdaan qaar hormuud ka ah is-beddelka iyo ololaha joojintajoojinta Gudniinka Hablaha, ee siyaasaddu hagayso
2. In iyada oo kaashanaysa Wasaaradda Shaqo-Galinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska iyo wasaaradaha kale ee ku lugta leh, ay boorriso, una ololayso kordhinta rugaha caafimaadka hooyada iyo dhalaanka, xarumaha caafimaad, rugaha caafimaad iyo cisbitaallada, si ay ula tacaalaan dhibaatooyinka nafsi ee ka dhasha Gudniinka Hablaha.
3. Xarunta Latalinta iyo kalotalinta Dhibaatada Gudniinka Hablaha ee Hargeysa in la hagaajiyo lagana dhigo goob heer qaran ah oo lagula tacaalo xaaladaha nafsi, lagana helo adeegyo daawayn bilaa lacag ah.
4. Iyada oo la kaashanayo Wasaaradda Warfaafinta, in la bilaabo wacyigelin bulsho oo ku saabsan dhibaatooyinka caafimaad ee Gudniinku leeyahay iyada oo la marinayo raadyowga iyo tilifishanka, jaraa’idka iyo biiraalayaasha iyada oo isticmaalayo Afka-Soomaaliga,
5. In wacyigelin la siiyo rugaha caafimaadka laguna tababaro joojintajoojinta Gudniinka Hablaha, iyada oo la bartilmaameedsanayo hooyada nuujinaysa iyo mida uurka leh.
6. In ay siiso kormeer taageero ah dhammaan rugaha caafimaad ee wada hawlaha Gudniinka Hablaha.
7. In ay samayso agab iyo hage ku saabsan qiimeynta dhimashada hooyada, si loo cayimo sababta dhimashada hooyada taas oo la xidhiidha dhibaatooyinka laga dhaxlo Gudniinka Hablaha.
8. In la bilaabo rugo caafimaad oo wareega goobaha miyiga ah si wax looga qabto dhibaatooyinka Gudniinka Hablaha, caafimaadka hooyada iyo carruurta marka laga tago dhibaatooyinka caafimaad ee kale.
9. In la kobciyo, korna loo qaado akhlaaqiyaadka iyo mabaaddiida caafimaadka ee ka dhanka ah ku dhaqanka caadada Gudniinka hablaha, iyada oo la horumarinaayo, aqoonta iyo tabobarrada hawlwadeennada caafimaadka

## 5.6 Wasaaradda Warfaafinta Dhaqanka iyo Wacyi-galinta:

1. Inay isku-duba-rido, kormeerto kana warbixiso hawlaha Gudniinka Hablaha ee Wasaaraddu ka waddo lixda gobol, kana qayb-gasho kulanka isku-xidhka ah ee ay gudoomiso Wasaaradda Shaqo-galinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoysku.

2. Iyada oo la shaqaynaysa Wasaaradda Shaqo-Galinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska in ay u hesho maalgelinta ololaha Gudniinka Hablaha ee saxaafadda ee hawada, qalabka gaadiidka iyo shaqaalaha, qaybta weyn ka ah wacyigalinta joojinta iyo JoojintaJoojinta Gudniinka Hablaha
3. In ay dhisto kartida saxafiyiinta ee Wasaaradda, gaar ahaana madaxda barnaamijyada ee raadyowga, tilifishanka iyo saxaafada daabacan, saxafiyiinta iyo wariyayaasha saxaafadada madaxa banaan.
4. Iyada oo la kaashanayo Wasaaradaha ay khuseyso, ururrada iyo bushada, in la sameeyo wacyigelin bulsho oo ku aadan joojinta iyo joojintajoojinta Gudniinka Hablaha, iyada oo loo marayo raadyaha, telefeshiinnada, iyo Jaraa'idka iyada oo la adeegsanaayo hababka ugu toolmoon ee wax lagu gudbiyo, tusaale ahaan (Cod, Muuqaal, Sawir, farshaxan, iyo riwaad/ama ciyaaro.).
5. In la taageero bilaabidda warbaahinta baraha bulshada – sida shabakada facebook loona adeegsado wacyigelinta joojintajoojinta Gudniinka Hablaha ee dugsiyada hoose, sare iyo ardayga jaamacadaha, macallimiinta iyo bulshada guud ahaan.

## 5.7 Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta

1. In ay isku-duba-rido, kormeerto kana warbixiso dhammaan waxbarashada diiniga ah iyo hawlaha wacyigelinta ee ku saabsan joojintajoojinta gudniinka hablaha ee lixda gobol, kana qayb-gasho kulanka isku-xidhka ah ee ay guddoomiso Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada ee bilaha ah.
2. In ay abaabusho Sheekhyada (rag iyo dumarba) ee lixda gobol si ay u sameeyaan wacyigelinta Gudniinka Hablaha waxaana ka mid ah, mawqifka Islaamka ee gudniinka.
3. In ay taageerto awood dhisid iyo tababar la siiyo Culimada oo ku saabsan Gudniinka Hablaha.
4. In la taageero waxbarashada diinta Islaamka iyo ololaha wacyigelinta joojintajoojinta Gudniinka Hablaha ee culimada diintu ay samaynayso iyo bulshada guud ahaanba.
5. In ay abaabusho barnaamijyo, khudbado diiniya oo ka baxa masaajidada dalka.

## 5.8 Wasaaradda Dhallinyarada iyo Ciyaaraha:

1. In ay isku-duba rido, kormeerto kana warbixiso dhammaan ololaha wacyigelinta dhalinyarada ee Gudninka Hablaha ee lixda gobol ka socda, kana qayb-gasho kulanka isku xidhka ah ee bilaha ay ee ay gudoomiso Wasaarada Shaqada iyo Arrimaha Bulshadu.
2. Iyada oo kaashanaysa Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, in ay lacag u raadiso ololaha joojintajoojinta gudniinka Hablaha waqtiyada ay socdaan tartamada ciyaaruhu, isreeb-reebku, hawlaha dhaqanku iyo masrixiyada fanaaniintu.
3. In ay dhisto awood/tababar siiso shaqaalaha Wasaaradda una tababarto tabo-barayaal si loo cidhibtiro Gudniinka Hablaha, (laba tababare oo gobol kasta ka socda oo kamid ah lixda gobol iyo saddex ka socda xarunta Wasaaradda). Tani waxa ay hubin doontaa madaxbanaanida iyo joogtaynta mashaariicda wasaaradda.
4. In la maalgaliyo ciyaaraha, isreeb-reebka koobabka iyo hawlaha dhaqanka iyada oo la siinayo agabka lagama maarmaanka u ah, qalabka (qalabka muusika) in la dayactiro garoomada, dadka khibrada leh (tababarayaasha iyo garsoorayaasha) lana maalgaliyo munaasibadaha.
5. In la kobciyo adeegsiga dhaqanka, ciyaaraha iyo isreebreebka, wacyigelin ahaan iyo abuuritaanka wacygelin joojintajoojinta Gudniinka Hablaha ee heer tuulo, degmo iyo gobol.
6. In si firfircoon looga qayb-qaato dabaal-dega hawlaha 6da February, iyada oo lala shaqaynayo Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, Caafimaadka, Waxbarashada iyo Warfaafinta, Diinta iyo Awqaafta iyo kuwa kale ee ay khuseyso.

### 5.9 Ururrada Bulshada

Mashaariicda ay sameeyaan ururrada bulshadu waxa lagu hagi doonaa siyaasadda qaran ee Gudniinka Hablaha. Iyada oo taas laga duulayo, shabakadaha ururrada bulshadu waxa ay isku-dubba-ridi doonaan, kormeeri doonaan kana soo warbixin doonaan mashaarciida Gudniinka Hablaha ee ay wadaan Ururrda Bulshadu ee ay fulinayaan ururrada xubnaha ka ahi. Markaas, daladaha ayaa Wasaaradda Shaqo-galinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska ka siin doona warbixin taas oo leh hoggaaminta guud iyo hagitaanka hawlaha Gudniinka hablaha oo dhan. Siyaasaddu waxay dhiirrigalinasaa adeegyada iyo mashaaricda isku dhafka ah ee aan mudaxnayn, sida barmaamijyada la dagaallanka fakhriga iyo Joojinta iyo JoojintaJoojinta Gudniinka Hablaha, si saamayn toos ah oo togan loogu yeesho waayaha iyo nolosha bulshada ee la rabo in ay joojiso , isla markaasna tirtirto Gudniinka Hablaha.

Ururadu maxalliga ahi waxay dawladda ka taageeri doonaan, dhanka fulinta siyaasadda, iyaga, sida faafinta farriinta wacyigalinta ah, qabashada tabobarrada, iyo taageeridda haayadaha dawliga ah eek u mushquulsan joojintajoojinta Gudniinka hablaha

#### 5.9.1 Daladaha Ururrada Maxalliga Ah:

- Waxay Si dhaw ula shaqayn doonaan Wasaaradda Shaqo-galinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska, si loo Joojiyo isla, markaasna loo Cidhintiro Gudniinka Hablaha.
- Ka qayb-geli doonaan kulanada isku-duba ridka ee ay guddoomiso Wasaaradda Shaqo-galinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoysku.
- Waxa ay xog kasoo ururin doonaan iyo warbixinta khuseysa si ay u diyaariso warbixin la isku geeyay oo ay siiso Wasaaradda Shaqo-galinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoysku oo ku saabsan mashaariicda, iyo adeegyada la xidhiidha Gudniinka Hablaha ee ay fulinayaan ururrada xubnaha ka ahi.
- Ka qaybgali doontaa ololaha iyo taageerada la siinayo hablaha iyo dumarka ee ku saabsan kor u qaadidda xuquuqda dumarka iyo hablaha ee Gudniinka Hablaha.
- Waxa ay door muhim ah ka ciyaari doontaa wacyigelinta iyo baraarujinta sharciga. Waxa ay waajihi doonnaan siyaasadda qaybteeda sharciga, shuruucda caalamiga ah iyo kuwa gobolka iyo dastuurka Jamhuuriyada Somaliland, iyada oo Gudniinka habluhu yahay ku-xadgudub xuquuqal insaan ee hablaha iyo dumarka.
- Dhinaca kale, saraakiisha boolisku waxay ku wacyigelin doonaan bulshada guud ahaan, xaga fulinta ee sharciga ka dhanka ah Gudniinka Hablaha ee la filayo in uu soo baxo dhawaan, isla markaasna la hirgalin doono. Waxa ay wax-ka-qaban doonaan arrimaha gabood falayaasha xuquuqda Aadamaha, ee sameeya, dhiirigaliya, qayb ka qaata, magangaliya ama u fududeeya samaynta Gudniinka Hablaha, habraaca xadhiga iyo eedaynta.
- In la taageero dhaqdhaqaadyada dhalinyarada eeka dhanka ah Gudniinka Hablaha si loo gaadho cidbtir rasmi ah jiilasha soo socda, lana gaadho halbeegii caalamiga ah ee 2030 in laga guuro gudniinka habalaha, iyo caadooyinka xunxun ee ka dhanka ah xuquuqda dumarka iyo Hablaha.

### 5.10 Hay’addaha Caalamiga ah, iyo kuwa Qaramada Midoobay

Waxa ay xukuumadda ka taageeri doonaan, iyaga oo siinaya khayraad maaliyadeed iyo mid macnawiyan ah, waxa kale oo ay siin doonaan taageero dhinaca farsamadda ah oo ku saabsan horumarinta siyaasadda, dhaqan galinta xeerarka iyo farsamooyinka fulinta, kormeeridda iyo qiimanta Siyaasadda Joojinta iyo JoojintaJoojinta Gudniinka Hablaha.

## CUTUBKA 6AAD

## 6. DABAGALKA IYO QIIMAYNTAHIRGALINTA SIYAASADDA

Hababka dhaqan iyo caadooyinku waa qaar aad u qoto-dheer, waxay qaadataa waqti dheer in la joojiyo, isla markaana la cidhibtiro. Sida caado-bulsheedyada kale, Joojinta Gudniinka Habluhu wax uu qaadan doonaa muddo badan. Laakiin, markasta oo si cilmiyaysan, oo qotodheer, looga shaqeeyo qorshaynta, naqshadaynta, fulinta, iyo qiimaynta adeegyada iyo mashaariicda wax lagaga qabanayo waxa suurto gal ah in la joogtayn karo isbeddelka dhinaca maanka dadweynaha iyo hab-dhaqanka bulsho ee ku aaddan Gudniinka Hablaha. Wasaaradda Shaqo-galinta, Arrimaha Bulshada iyo qoysku waxay samayn doontaa tilmaamayaal daba-gal, qiimeyn iyo waxbarasho ah si ay ku cabirto horumarka, tayada iyo saamaynta barnaamjiyada fulintooda iyo dhaqangalka siyaasadda Qaranka. Wajiga koowaad ee barnaamijka waxa uu socon doonaa muddo shan sanno ah. Warbixinta kormeerka waxa loo diyaarin doonaa qaab saddex bilood ah, lix bilood ah iyo sannad leh.

Qiimaynta muddada dhexe waxa la samayn doonnaa kala badhka sanadka saddexaad ee fulinta, si loo helo xogta horumarka la sameeyay iyo dib-u-qorsheynta barnaamjiyada.Qiimaynta dhammaadka waxa la qaban doonaa dhammaadka sanadka shanaad ee fulinta barnaamijka si loo qiimeeyo saamayntiisa.Tani waxa raaci doona qorshaynta Jaangoynta ee wajiga labaad ee fulinta barnaamijka.

### 6.1 Dib-u-eegista Dhaqan-galka Siyaasada

Dib-u-eegista jihaynta (siyaasada) waxa la samayn doonaa kaddib shan sanno marka barnaamijka la qiimeeyo. Dib-u-eegista ku xigta waxa la samayn doonaa shan sanno kaddib ama waxa lagu go’aamin doonaa fulinta wajiga koowaad.